

WAA WAAJIBKEYGA

inaan soo tebiyo xadgudubka
Jinsiga iyo dhiigmiirashada



Haddii uu jiro shakiga haba yaraadee ee xadgudubka galmada ama si xun uga faa'iideysiga mid ka mid ah asxaabteyda (isla hay'ad gudaheeda ama banaankeeda), waxaa waajib igu ah in aan u gudbiyo maamulka sare iyo / ama maareeyaha maamulka bani'aadamka.

Abuurista iyo joogtaynta
deegaan

KA HORTAGA KA FAA'IIDEYSIGA GALMADA



Kormeere ahaan, Waa waajibkeyga inaan abuurto oo aan ilaaliyo deegaan ka hortaga ka faa'iideysiga galmada iyo ku xadgudubka isla markaana dhiirrigeliya hirgelinta xeerarkan anshaxa.

WAA IN AAN LOO DULQAADAN

wixii xadgudub galmo
ah



ka Shaqaale samafal ahaan, waa in aan u dhaqanna si dulqaad la'aan ah wixii xadgudub galmo ah. Si xun uga faa'iideysiga galmada iyo ku xadgudubka ka kooban falal anshax xumo ah kaasoo oo sababi kara in shaqada ku waayo.

Xeerka anshaxa ee Ka Faa'iideysiga
Galmada iyo Xadgudubka



unicef
for every child


Dhaqdhaqaaqa galmo ee ilmaha yar

WAA MAMNUUC



Waa mamnuuc in galmo lala yeesho carruurta (Shakhsiyaadka da'doodu ka yartahay 18). Aaminaadda in ilmuhu ka weyn yahay 18 sano ma aha cudurdaar. Tani waxa ay ka dhigan tahay ficiil anshax xumo ah oo aan ku waayi karo shaqadeyda.

Niyad jabinta, bahdilka ama habdhaqanka dhiigmiirashada waa mid aan **LA AQBALI KARIN**



Iacag ku badashada galmada, shaqada, badeecada ama adeegyo looga gol-leeyay xadgudub jinsi ama qaabab kale oo niyad jabin, Sharaf-ridid ama habdhaqanka dhiigmiirashada waa mamnuucay. Tan waxaa ka mid ah isdhaafsiga caawimaada taas oo ay ugu wacan tahay ka faa'iideystayaasha.

WAA IN AAN LOO DULQAADAN

xiriiro galmo taasi oo wax u dhimeysa sharafta shaqada bani'aadanimu



Xiriir kasta oo galmo oo ka dhexeeya kuwa bixiya caawinaada bani'aadannimo, ilaalinta iyo qofka ka faa'iideysanaya caawinaada bani'aadamnimada iyo ilaalinta oo ku lug leh adeegsiga aan habooneyn ee kafa'adaysiga darajada ama jagada waa mamnuuc, xiriirrada nuucan ayaa wax u dhimaya aaminaadda iyo daacadnimada shaqada gargaarka bani'aadamnimo.